



Somalisch

Gelitaanka Xannaanada Carruurta — Shuruudaha Gelitaanka marka laga eego dhanka Takhaatiirta Dugsiga iyo kuwa Cilmi-Nafsiga.

Gelitaanka Xanaanada Carruurta waa tallaabo muhiim u ah nolosha Ilmaha. Carruurta ilaa iyo 31-da Luulyo da'doodu tahay afar sano aaya la geeyaa Xanaanada Carruurta. Carruurta way ku kala duwan yihiin koritaanka meel walbana si isku mid ah ugama koraan – Xanaanada Carruurta aaya kasoo qaadayso mid walba heerka uu joogo si gaar ahna u horumarin doonto.



Tallaabo Tallaabo

Inta lagu guda jiro sanadaha ugu horreeyo nolosha ilmaha, waxay hantaan kalsooni sii kordhaysa oo ay si tartiib ah uga fogaanayaan nolosha qoyskooda muddo kooban, ayagoo xiisaynaya inay wax ka ogaadaan nolosha bannaanka ah. Kooxaha Ciyaaraha Ilmaha iyo Xarumaha lagu hayo Carruurta aaya hadaba ah Goobaha ugu muhiimsan ee waxbarashada iyo Tababarka dhallaanka. Marka ay Carrurta gaaraan afar sano, inta badan Carrurta waxay buuxiyaan shuruudahii Jir ahaaneed, Dareen-Bulsho ahaaneed iyo waliba shuruudaha aqooneed ee looga baahnaa si ay ugu diyaar noqdaan uguna furfurnaadaan, sidii ay uga gudbi lahaaseen caqabadaha deegaanka cusub ee Xanaanada Carruurta.

Shuruudaha Bilowga Wanaagsan ee Xanaanada Carruurta

Ilmaha waa inuu diyaar u yahay inuu maalin kasta gelinka hore oo dhan waqtii la



qaato Koox weyn oo Carruur ah oo ay isku da'yihii ama ka yara weyn kuwaas oo hoos yimaada macalinka Xanaanada Carruurta ee markaasi la joogo. Fikradaha ka yimaada Xanaanada Carruurta waxay kor u qaadaan Tallaaboyinka ugu habboon ee horumarinta da'da ilmaha. Tani waxay guulaysataa marka ilmuu si buuxda uga qeyb qaato ciyaaraha furan iyo casharada tilmaaman ee uu dhammaan dareemayaasha ilmaha adeegsan karo. Sababahan dartood, dhaqaatiirta Carruurta ama Dhaqaatiirta cudurada guud ayaa ku hubinaya 4ta jeer ee baaritaan-sanadeedka, in Ilmuu si wanaagsan wax u arki karo ama u maqli karo iyo inuu baahanyahay caawimaadda aragga ama caawimaadda maqalka iyo in kale.

Si Bilowga Xanaanadu u noqdo mid guuleysto, waa inay carruurtu inta badan buuxiyaan shuruudahan soo socda. Ma ahan shuruudahan **mid mid in ay u buuxiyaan, balse sawirka guud ee heerka horumarkooda** aaya muhiim u ah u diyaar garowga xannaanada.

Shuruudaha Jir ahaaneed

► Ilmaha Xanaanada imaanayo waa inay noqdaan kuwo soo jeeda oo waxii loo sharaxayo fahmi kara, si ay si firficoon uga qeyb gali karaan barnaamijiyada Xanaanada Carruurta. Si tani suurta gal u noqoto waxaa loo baahanyahay inay

Wax in la ogaado ay muhilim tahay: Khubarada maanta Jir waxay aaminsanyihilin in sida ugu wanaagsan ee carruurtu u horumari karaan iyo sida ugu wanaagsan ee loo dhilri gallin karo loona baraaruujin karo ay tahay, marka adeegyada deegaankooda ka jiro ay yihii kuwo waafaqsan heerka uu joo-go horumarka ilmaha.

helaan hurdo ku filan oo aan ka qasmin habeenkii.

- Waa in aysan u baahnay cuntada la siiyo carruurtu yar yar, oo ay cunaan subaxdii quraacda caadiga ah si ay u helaan awwood.
- Waa inay awwoodaan inay Xanaanada u lugeeyaan.
- Waa inay kaligood furan karaan oo cuni karaan cuntada xiliga bareega ee guriga ay kala yimaadeen.
- Waa inay dareemi karaan markay u baahan yihii inay musqusha aadaan misna aadi karaan iyago caawimaad yar helaya (tusaale ahaan furitaanka Badhamada Surwaalka).
- Ilmuu waa inuu leeyahay xirfadaha aasaasiga ah iyo sidoo kale xirfadaha qaar sida orodka, boodboodka, fuulista jarjanjarada iyo sidoo kale sawir gacmeedka, wax jarista, gacmo dhaqas-



hada, nadiifinta sanka, xirashada iyo is-ka bixinta dharka iyo kabaha.

Shuruudaha Bulshadeed iyo shucuureed

- ▶ Ilmuu waa inay awoodaan inay subaxdii oo dhan ka maqnaan karaan dadka ay ku tiirsanyihiin, una baahnayn masaaska carruurta lugu aamusiyoo.
- ▶ Waa inay isku dayi karaan inay si cad u muujiyaan baahiyahooda si ay dadka kale u fahmaan.
- ▶ Waa inay ku dadaalaan inay si habboon ula xiriiraan carruurta kale iyo macalimiinta.
- ▶ Waa inay fahmaan sharciyada iskuna dayaan inay ku dhaqmaan.
- ▶ Waa inay ku dadaalaan inay Khilaafaaka ku xalliyaan rabshad la'aan
- ▶ Waa inay ku dhiirran karaan, isku dayga markay wax ku guuldarreystaan kaddib.
- ▶ Waa in ilmuu noqdaan kuwo la sabar siin karo.

Shuruudaha Dhanka Aqoonta

- ▶ Ilmaha Xanaanada waa inay indha-indheeyn karaan oo raaci karaan tilmaamaha ciyaarahaa dhaqdhaqaqa leh, kuwa gacmaha laga qabto iyo farshaxanka.
- ▶ Waa inay ka falcelin karaan oraahda macalimiinta oo fahmi karaan, fulina karaan howlaha fudud ee loo dhiibo.
- ▶ Waa inay ku nagaan karaan ciyaarta, waa inay sugi karaan oo sabri karaan inta laga gaarayo.

Gelitaanka Xannaanada Carruurta kahor Waqtigii loogu talagalay

Sharci ahaan, gelitaanka Xannaanada kahor waqtigeeda ma aha mid suurto gal ah.

Dib u dhigidda Gelitaanka Xan-aanada Carruurta

Dib u dhigidda gelitaanka Xannaanada iyadoo sabab looga dhigaayo heerka horumarka ee ilmuu joogo waa mid dhif ahoo aysan dan ugu jirin ilmaha. Sababtoo ah, heerka la rabo ee horumarka ilmaha badanaa ma ahan mid iskood u yimaada, balse waa mid yimaado ayadoo loo marayo garab istaag bartilmaameedsan. Taasi micnaheedu waa in ilmuu u baahan yahay garab istaag gaar ah inta lagu jiro waqtigaan. Intaa waxaa sii dheer, Haddii carruurta dib loogu celiyo kuwa sanad ka waaweyn, ama ka dhaadheer, ama ka xoog badan, asxaabta ay isla sanad-dugsiyeedka Xannaanada iskula jiraan, taasi waxay badanaa horseeddaa dhibaatooyin Daren iyo mid Bulsho. Kii-saska qaar wa in codsi dib u dhigid ah loo gudbiyya guddiga dugsiyada ee degmada. Takhtarka dugsiga ama Cilmi nafsiyaaya macquul ah in lala kaashado oo loogu yee-ro aragtii labaad. Qaar ka mid ah dugsiyada degmooyinka, waxay sidoo kale dalban karaan shahaado caafimaad.

Ka boodidda / Ku celinta sanad-dugsiyeedka Xannaanada carruurta

Guud ahaan Xanaanada waxay qaadataa labo sano. Qaar yar oo Carruurta kamid ah, kuwaas oo horumarkooda aqooneed ama shaqsiyeed u saamaxo ama uu hakiyo, ayaa laga yaabaa in hal sano kadib loo gudbiyo dugsiyada hoose ama dib uga dhaco oo sanad saddexaad loogu sii doro xanaanada.

Daryeelka dhanka Dugsiga / Xa-runta Carruurta

In Ilmaha yar ee Xannaanada uu maalinka oo dhan uu waqtii la qaato waxna la cuno koox badan oo carruur ah oo kala da'aad duwan waalid koodana la joogin waa wax cusub oo ku culus. Hadba Khibradiisa hore

iyo dabeeecaddiisa, ayuu ilmaha u arki karaa tani inay tahay mid fursad u ah ama mid culeys ku abuurtta. Sii ilmahaaga waqtii uu si tartiib tartiib ah ula qabsado qaab da-ryeekan cusub.

Tallaabooyinka Waxbarashada Gaarka ah

Tallaabooyinka waxbarashada gaarka ah waxaa tusaale ahaan kamid ah luqadda, taageerada waxbarashada gaarka ah ama baahiyaha gaarka ah ee maskaxda ama jirka. Haddii ilmuu u baahanyahay tallaabooyin waxbarasho oo gaar ah marka uu galayo xanaanada, arrintaa waxaa loo gudbin karaa guddiga dugsiyada degmada si baaritaan loogu sameeyo. Haddii kale waalidiinta ayaa lagala hadli doonaa baahida ilmaha inta lagu jiro xanaanada.

Maxay Waalidiintu Sameyn Ka-raan?

Waalidiintu waxay taageeraan ilmahaada, markay ku dhiirigeliyaan inuu noqdo mid madax-bannaan oo awoodiisa waxbarasho ay ku kalsoonaadaan. U sheeg ilmahaada in marka laga reebo waayo aragnimmada wanaagsan ee ay ka dhaxlaan sidoo kale khilaafadka iyo guuldarradu ay qayb ka yihii habka waxbarashada. Qaab furan oo loo wajaho macalimiinta iyo Dugsiga waxay bilowga horeba muhiim u tahay taageerada horumarka waxbarashada ee carruurta.

Wadahadal

Raadi markiiba wadahadal aad la yeelato macalimiinta haddii aad wax u baahantahay.

Hadba baahida jirto ayaa sidoo kale waxaa wadahadal ka lagu dari karaa Takhtarka dugsiga ama cilmi nafsiya, guddiga dugsiyada ee degmada mas'uulka ka ah, ama khubaro kale (Tusaale ahaan, Takhtarkaaga carruurta, Howlwadeenada ku lugta leh taageerada ilmaha ama kuwa la tacaala).

Halka lagala xiriilo iyo Xog dheeraad ah:

Schulgesundheitsdienste der Stadt Zürich (Adeegyada Caafimaadka ee Dugsiyada Magaalada Zurich) Schulärztlicher Dienst und Schulpsychologischer Dienst (Adeegga Dhaqtarka iyo Adeegga Cilmi nafsiya Dugsiyada) www.stadt-zuerich.ch/sg

